

War-saxaafadeed

Olole ballaaran oo tallaalka jadeecada ah ayaa ka socda koonfurta Soomaaliya

Kismaayo, Jubbada Hoose, Soomaaliya 16 Disembar 2016 - UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa ku taamaya in ay tallaalaan 54,000 oo carruur 10 sano jir ka yar oo ku nool Kismaayo, koonfurta Soomaaliya ka dib markii ay jadeeco xun halkaas ka dillaacdey.

Waxaa jirey in ka badan 704 xaaladood oo lagu arkey qandho iyo shubaax ka soo baxdey oo jooga Kismaayo, kuwaas oo badidoodu yihiin carruur. Qaar badan oo ka mid ah carruurta, oo looga shakisan yahay in ay qabaan jadeeco, ayaa seexanaya sagxadda Isbitaalka Guud ee Kismaayo. Badidoodu lagama tallaalin jadeeco in kasta oo ay jiraan 16 rugood oo tallaal lacag la'aan ah lagu bixiyo oo ku yaalla Kismaayo.

UNICEF ayaa gacab ka geysatey in degdeg Kismaayo loo geeyo 55,000 qiyaasta tallaalka jadeecada ah ee mar qofka lagu mudo ah oo ay weheliyaan Fitamin A dheeri ah oo xoojiya difaaca jirka. Tallaallada waxaa maalgeliyey Xafiiska Gargaarka Masiibooyinka Dibadda ee Mareykanka / *the Office of US Foreign Disaster Assistance* (OFDA) iyo dalka Japan.

Horraantii bishan, ayaa UNICEF waxaa ay Isbitaalka Guud ee Kismaayo siisey daawooyin iyo sahay caafimaad kale oo naf-badbaadin ah si loogu daaweeyo dadka qaba jadeecada, iyo sidoo kale saddex qaboojiye oo loogu talogaley in lagu keydiyo tallaallada, oo ay maalgeliyeen deeq-bixiyeyaal badan oo ay ka mid yihiin Waaxda Horumarinta Dibadda ee Ingiriiska / *the UK's Department for International Development* (DFID), Finland, Japan, Sweden, Switzerland iyo Hay'adda Mareykanka ee Horumarinta Caalamiga ah / *the United States Agency for International Development* (USAID).

"Jadeecadu waa mid ka mid ah cudurrada dilaaga ah ee looga hortegi karo tallaalka laakiin nasiib-darro ma aha midda keliya ee ka jirta Soomaaliya," ayaa yiri Jeremy Hopkins, Ku-simaha Wakiilka UNICEF Somalia. "Si weyn ayaan mahadcelineynaa deeq-bixiyeyaasheenna, laakiin waxaan u baahannahay in la kordhiyo taageerada si loo hubiyo in dalka oo dhan aan gaarsiinno tallaalka iyo in aan bulshooyinka degaanka la shaqeyno si loo hubiyo in ilmo kasta uu qaato tallaalka buuxa."

Jadeecada ayaa tilmaan muhiim u ah sida ay u xooggan yihiin nidaamyada tallaalka ee dalalka waxaana Soomaaliya ay ka mid tahay dalalka heerkoodu tallaalkada uu ugu hooseeyo dunida oo dhan. Jadeecadu waa cudur fayrus uu keeno oo aad u faafa waana sababta ugu badan ee ay u dhintaan carruurta yaryar ee Soomaaliya. Waxaa ay sababi kartaa oof-wareen, shuban iyo caabuq ku yimaada maskaxda (*encephalitis*) oo sababa maskaxda oo bararta iyo indho-beel waxaana ay cudurku weeraraa kuwa uu difaaca jirkooda jilicsan yahay nafaqo-xumo, yaraanta Fitamin A iyo xaalado nadaafad xumo daraaddood. Waxaa looga hortegi karaa laba jeer oo la qaato tallaalka aan dhibaato lahayn oo taabagal ah.

Gavi, oo ah Isbahaysiga Tallaallada (*the Vaccine Alliance*), ayaa maalgelinaya qaboojiyaha iyo waxqabadyo wacyigelin ah, iyo sidoo kale tallaalka cudurka dabeysha ee dhowaan la bilaabey (IPV) iyo tallaalka *Pentavalent* oo loo adeegsado cudurrada Qaaxada, Gowracatada, teetanada, xiiq-dheerta, cagaarshowga *hepatitis B* iyo tallaalka cudurrada qoor-gooyaha, oof-wareenka iyo caabuqyada kale ee loo yaqaanno *Haemophilus influenza type b* (Hib).

Macaluumaad dheeri ah, fadlan kala soo xiriir:

Susannah Price, Madaxa War-isgaarsiinta +254 722 719867, sprice@unicef.org

Ezatullah Majeed, Ku-simaha Madaxa Caafimaadka +254 207628454,

emajeed@unicef.org